Erayga iyo Maanta Somtwt 0069

Aabaha

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay,**Aabaha**.

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka marka aynu ka hadlayno mawduucan xiisa leh ee ku saabsan **Aabaha** ee uu inoo qaadaa dhigi doono Bawlos. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

SONG: REEL—CUT—

Salaadda waa mid ka mid ah hadiyadaha ugu waaweyn ee Ilaah siiyey carruurtiisa. Waa xasaanad cajiib ah in a helo fursad Ilaah toos loogula hadlo, iyo in la ogaado, casumaaddiisa, taasoo uu inagu weyddiistay inaan isaga u nimaadno. Wuxuuna inoo ballan-qaaday inuu maqlayo ducadeenna.

Mawduuca ku saabsan ducada, waa mid ballaaran, waxaanan ka baranaynaa maaddooyin fara badan. Waxaan jeclaan lahaa inaan mawduuca caawa ku soo koobo oo keliya "Aabbahayaga Samada ku jira", oo aalaaba loo yaqaanno, "Baryada Rabbiga." Waxayna qisadu ku qoran tahay cutubka 6aad ee Injiilka sida Matayos u qoray.

Xertii ayaa waxay Ciise Masiix weyddiisteen inuu baro sida loo tukado. Wuxuuna ugu jawaabay, “Markaad tukanaysaan, waxaad tiraahdaan…” Sidaas ayuu haddaba u baray Masiixu xertiisa sida loo tukado,ama ‘Salaadda Sayidka’. Waxaan innaga oo dhan garanaynaa inay ku bilaabato, “**Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin**.”

Taasina waa hadallo kalgacal-tooyo oo aad u wanaagsan—waa isla sida carruur aabbahood u tegaya, o og in Aabbuhu jecel yahay, daryeelo, oo welibana uu difaaco—isla sidaas ayaannu innaguna ugu tagaynaa isaga markii aynu baryeyno.

Isagu waa Aabbaheen, wuu ina jecel yahay, oo ina daryeelaa, oo ina siiyaa wixii aan weyddiisanno. Taas aawadeed waxaan ugu imanaynaa sidaas, maaddaama uu yahay Aabbaheenna jannada. Waxaase ayaandarro ah, dunideenna maanta, waxaa jira qoysas dumay iyo carruur lagu ciyaaray. Waxaanan u malaynayaa inay jiraan kumanaan qof dunidan, kuwaasoo neceb odayaashii dhalay, sidii ay ula dhaqmeen darteed, iyo inaanu ilmihiisa tusin wax kalgacal ah.

Laga yaabo xitaa inaanay weligiiba arag ilmuhu. Dadka qaar baaban ogayn cidda uu aabbahood yahay. Marka, haddii aad fasiraad ka bixiso erayada, “Aabbaheenna Samada ku jiroow”, ayaa weedhaasu waxay ka turjumaysaa inuu jiro xiriir wacan oo u dhexeeya ilmaha iyo Aabbaha. Waa xiriir ku dhisan jacayl iyo daryeel.

Waana sida aynu ugu soo dhowaanno Ilaaheenna samada, innagoo ogsoon inuu ina jecel yahay oo uu ina daryeelo. Qaybta kowaad ee salaadda, ayaa waxaan leennahay, **“Magacaagu Qodduus ha ahaado.”** Qodduus waa eray aynaan sida badan ku isticmaalin hadalladeenna maalin kasta. Waa eray macaanigiisu cad yahay.

Wuxuu eraygu ka macne yahay **“qodduus ha ahaado Magacaagu.”** Waxaa beryahan dhaqan iyo caado noo ah inaan si xun u isticmaalno magaca Rabbiga. Waxay u eg tahay in dhalinyarada ay si aan habboonayn u Hadal-qaadaan magaca Ilaah iyo Ciise Masiix, oo hadalkooda laga waayyi maayo. Haddaba marnaba yaanay kula noqon inaanu Ilaah ku daryeelin. Bil xaqiiqa Ilaah wuu ku daryeelaa. Xaqiiqatan, marka la eego Tobanka Sharci, Ilaah maaddadan daryeelka ayuu ku soo darsaday—waana sharciga 2aad. Haddaan horey u sii wadno maaddada Tukashada Rabbiga, ayaannu haatan soo gaaraynaa arrin codsi ah, oo waxaa la leeyahay,

“Boqortooyadaadu ha timaaddo.” Tan iigu dhibka badan ee aan garan la ahay waxay tahay, in dadku si boobsiis ah u akhriyaan ‘**Tukashada Rabbiga**’. Idaacado dhowr ah oo urur-kaniisadeedyo leeyihiin ayaan dhegaystay iyadoo ‘**Salaadda la akhrinayo**’, waxaanan la yaabay sida dhaqsiyaha leh ee ay salaadda u oogayaan.

Waxay u muuqataa, markaad eegto degdegta loo akhrinayo, inay xifdiyeen laakiin aanay ka imanaynin niyadahooda. Ma jiro qof inta boobsiis u akhriya, haddana hadallada uu akhrinayo ka fakari kara macaaniga ka dambeeya. Haddii waxa ay samaynayaan ay tahay akhrinta wax ay xifdiyeen, balse aan laga fakaraynin, lama oran karo waa salaad ama tukasho.

Waa wakhti lumis, oo baryadaas oo kale ee aan macnaha lahayn, Ilaah ma maqlo. Waxaan beri hore booqday macbudyada asnaamta lagu caabudo, waxaanan halkaa kula kulmay dad cibaadaysanaya, oo inta waraaq wax ku qorqoraan, wiifow, dul saaraya oo markii dabayshu luxdo, ay la tahay in ducadoodii la aqbalay. War maxay khuraafaad aaminsan yihiin. Markiise kniisaddii Rooma ay keeneen tusbaxa boqollaal sannadood ka hor, waxay lahayd ahmiyad loo sameeyey iyo macne sugan oo ka dambeeya.

Waxay tusbaxa u isticmaali jireen inay ku xusuustaan mawduucyada ay ka tukanayaan. Balse kuwa maanta isticmaala, degdegta ay u kalwinayaan ayaa u ekaysiinaysa inaanay kal iyo laab ka ahayn wardiga, oo uusan qalbiga ka imanaynin. Waxaa taas la mid ah degdegta loo meeriyo **Tukashada Rabbiga**, sida in waxa aad akhriyeyso ayan micne iyo ujeedo lahayn.

Waxaan fahamsanahay sida ay u sahlan tahay in xeer iyo figradaha dadka ugu dambaynta ay u noqdaan wax aan micne lahayn. Waxaan xusuusanahay in beryihii hore waxyaabaha laga ducaysanayo iyo dadka loo ducaynayo lagu xisaabi jiray faraha. Xeerku sidan buu ahaa. Farta kowaad waxaa loo isticmaali jiray in lagu farmuuqo qofka ducaynaya.

Waxaad u ducaynaysaa kuwa kuu baaqa, oo iyagana u ducaynaya waalidkaa, macallimiinta iwm. Farta dhexe ayaa iyana waxay xusuusinaysaa dadka ducaysanaya in la xusuusto dadka amarka leh sida madaxda, taliyayaasha iyo mudanayaasha, iyo hawl-wadeennada kale.

Farta xigta ee ka horraysa far-yarayda ayaa dadka ducaysanaya ay ku xusuusan jireen dadka masaakiinta ah ama baahan. Ugu dambayntana faryarada waxaa lagu xusuusan jiray in ilmaha loogu duceeyo. Markii haddaba aad eegto suulka wuxuu tilmaamayaa dhinacaaga, markaasina waxay ka macne tahay inaad isku ducayso.

Haddaba maal-maheenna haddi qofi gacanta dhinacaaga u soo taago—oo kugu yiraahdo wuu ducaysanayaa—taasi waxay kuula muuqanaysaa sida xujo oo kale ama wax aadan garan karin. Koox kasta sidaas dhaqsiyaha leh uma ducaysan karto, iyadoo aan qalbi loo haynin, oo aan la milicsan dhibka xiisadaha hor yaalla kuwa dukanaya.

Markii haddaba aad timaaddo qaybta leh, **“Boqortooyadaadu ha timaaddo”**, ayaa boqortooyadu ay u qaybsan tahay saddex qaybood, waana, Boqortooyada Awoodda, iyo tan Ammaanta, iyo tan Nimcada. Haddaba garan maayo sida aad uga fakari karto saddexdaas boqortooyo, haddii aad degdeg ku tiraahdo, **“Boqortooyadaadu ha timaaddo’**, oo aad ka gudubto.

Waa inaad ka fakarto inaad Ilaah weyddiiso inuu go’aan ka gaaro wax kasta. Ilaah baa xukunka koonka maamula, oo mararka qaar waxay inala tahay inaan ilowsan nahay taas. Waxay nala noqotaa in dad uu maamulka hayo. Haddaba Ilaah u doodi maayo xukunka dunida inuu yeesho, balse isaga ayaa weli ah Maamulaha wax kasta.

Dabadeedna waxaad haysataa ama leedahay boqortooyada nimcada. War maxay boqortooyo macne leh tahay. Taasina waa kiniisadda. Saamaxaadda, naxariista iyo jacaylka, waxay soo dhex maraan wacdiska hadallada Ilaah iyo maqalka hadalka Ilaah. Ruuxa Qodduuska ayaa ina xusuusinaya saamaxaadda layna siiyey iyo nabaadiinada aynu haysanno.

Baryadeennu waxay noqonaysaa haddaba in kaniisaddu korto oo fiddo. Dabeetana waxaan Ilaah weydiisanaynaa in Boqortooyadiisa Ammaanta ay dunida timaaddo. Waxaanan ku leenahay, **“Rabbiyow diyaar baan u nahay inaad timaaddo oo aad isku kaaya muujiso. Na gee jannadaada, waayo waannu ka daalnay dhibaatada iyo xiisadaha dunidan yaalla.”** Marka la leeyahay, **“Boqortooyadaadu ha timaaddo,”** waxay ka macne tahay, Ilaahow noo imow, oo na gee jannadaada, halkaasoo aan lahayn murugo iyo qoomamo. Markaan haddaba niraahno, **“Boqortooyadaadu ha timaaddo”**, waxyaalahaas oo dhan ayaannu weyddiisanaynaa, markaasina waa inaynu si deggan oo aan degdegi ku jirin u niraahno, si qalbigeenna iyo maankeenna aynu uga ducaysanno, laakiin aanay u noqon wax afka ah un.

SONG: REEL—CUT---

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale) Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060